



Nidaam Dawladeedka Soomaaliya qaadatay waa nidaamka Federalka oo ah daadejinta maamulka iyo awoodaha Dawliga ah, qodobka 48AAD ee Dastuurka Soomaaliya ayaa qeexaya nidaamka Dawladeed ee Soomaaliya qaadatay kaasoo dhigaqa

Farqada 1AAD (1) Qaab-dhismeedka Dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu ka kooban yahay 2 heer Dawladeed:

- (a) Heerka Xukuumaddu Federaalka
- (b) Heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa ka kooban tahay Xukuumaddu ka tirsan Dawladaha Federaalka iyo Dawladaha Hoose.

Farqada 2AAD (2) Gobol goonni isu taagi karaa ma jiri karo, inta uu Gobol kale uu kuu biirayo, Xukuumaddu Federaalka Soomaaliya ayaana maamulaysa waxaana waajib ku ah gobolkaas inuu ku biiro gobol kale ama Dawlad xubin ka ah Dawladda Federaalka muddo labo sano gudahood ah.